


RAAGSAN

# Xoojinta Seeska Talagelinta: Xallinta Caqabadaha Barnaamijka Talagelinta ee Soomaaliya


Faallo Kooban | Nofeembar 2023

## Caqabadaha Haysta Barnaamijyada Talagelinta Bulshada ee Soomaaliya Xasillooni la'aan siyaasadeed iyo amni daro

- Xasillooni la'aan siyaasadeed iyo amni darro
- Hannaanka dawladnimada iyo hay'adaha oo daciif ah
- Faham yaridda dadweynaha ee ku aadan kaalinta dawladda iyo u adeegidda bulshooyinka
- Heerka akhriska iyo qoraalka dadweynaha oo aad hooseeya

## Maxay yihiin tilaaboyinka wax ku oolka ah ee lagu xoojin karo talgelinta muwaaddiniinta?

- Soojinta qaab-dhismeedka sharciga si loo ilaaliyo loona horumariyo talgelinta muwaaddiniinta
- Talgelinta dhallinyarda, dumarka, iyo kooxaha la takooro
- Hirgalinta hannaan ay muwaaddiniintu ku soo gudbiyaan ra'yigooda ku aaddan adeeggyada ay helaan
- Diyaarinta madal islafalgal oo ay ku middaysanyihiin dawladda iyo muwaaddiniinta oo looga dodo adeeg bixinta.
- Dib u habeynta talagelinta muwaaddininta, ee ku aadan hannaanka dowlada



## Dulmar Kooban

Soomaaliya waxa ay leedahay nidaam siyaasadeed iyo bulsho oo aad u murugsan oo ay qaabeeyeen tobanaan sano oo colaado iyo xasillooni darro ah. In kasta oo ay hadda socdaan dadaallo badan oo dalka dib loogu dhisayo, haseyeeshii dadaalladii lagu dhisi lahaa bulsho dimuqraaddi ah oo xasilloon waxaa carqaladeeyay xasillooni darrada siyaasadeed iyo hay'adaha dawladda oo daciif ah .

Talagelinta bulshada waxa ay aasaas u tahay xaqiijinta in codadka iyo baahiyaha muwaaddiniinta ay matalaad dhab ah ka helaan hannaanka dawladnimada, iyada oo hirgalinaysa fursado ay muwaaddiniintu kula xisaabtami karaan hoggaanka haya talada dalka. Hase ahaatee, talagelinta bulshada ee Soomaaliya waxa ay ku astaysan tahay qodobbo dhowr ah, sida in aan kalsooni lagu qabin dawladda, helida xogaha iyo dhaqaalaha oo xaddidan, qaab-dhismeeka hay'adaha oo daciif ah, iyo caqabado xagga dhaqanka ah ee la xiriira ka qaybgalka. Caqabadahaas ayaa abuura dareen awood li'i ah oo ka dhex jira muwaaddiniinta, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda qaybaha bulshada ee laga tabarta roon yahay ama la takooro.

Faallo siyaasadeedkan kooban, waxa aan ku eegeynaa caqabadaha la xiriira ka qaygalka bulshada si xog loogu biiriyo dadaallada lagu yaraynayo kala fogaanshaha u dhexeeya siyaasad-dejiyeyaasha iyo muwaadiniinta ku nool gudaha Soomaaliya, annaga oo ka faa'iidaysanayna natiijooyinka cilmi-baarista iyo talooyinka khubarada. Waxaa jirta wacyigelin la'aan ka jirta bulshada oo la xiriirta muhiimadda ay leedahay ka qeyb qaadashada iyo ka qeybgalka muwaadiniinta iyo fahamka doorka dowladnimo ee Soomaaliya, taasoo keentay in hoos u dhac ku yimaado wada shaqeynta shacabka iyo dowladda hoose.

Qormadaan ayaa waxa ay eegeysaa caqabadaha talagelinta bulshada oo ay ka mid yihiin helid la'aanta xogta, aqoonta muwaaddinka oo hoosaysa, akhris iyo qoraal la'aan aad u sarraysa, iyo xusuus dheer oo colaado iyo xasillooni darro ah. La tacaalidda caqabadahaas ayaa muhim u ah xoojinta talagelin bulsho oo wax ku ool ah iyo dhismaha bulsho dimuqraaddi ah oo loo dhan yahay. Waxa ay qormadaani qalinka ku duugaysaa muhimadda talagelinta bulshada ee horumarinta bulsho dimuqraaddi ah oo xasilloon, iyada oo soo bandhigaysa talooyin ku aaddan xoojinta talagelinta bulshada ee Soomaaliya, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo hannaanka aasaaska bulshada oo hortebin siiya baahiyaha iyo aragtiyaha dadka degaanka. Iyada oo hortebin siinaysa ka qaybgalka muwaaddinka, xoojinta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, iyo dhismaha qaab dhismeed hay'adeed oo xooggan, Soomaaliya waxa ay dhidibbada ku aasi kartaa bulsho loo dhan yahay oo dimuqraaddi ah taas oo ka jawaabaysa baahiyaha iyo yididiilooyinka dhammaan Soomaalida.

## Hordhac

Waxaa jira dalabaad caalamka oo idil ah oo soo kordhayay oo muwaaddiniinta ka imanaya oo ay ku dalbanayaan in ay cod mug leh ku yeeshaan go’aamada hay’adaha dawladda, iyo in dawladuhu ay noqdaan kuwa dadka oo dhan iska dhex arki karaan, kana jawaabaysa baahiyada muwaaddiniinta. Sare u kaca teknoolojiyada cusub waxa ay muwaaddiniintu u abuurtay fursado aan hore loo arag oo ay si toos ah ugula xiriiri karaan siyaasad dejiyeyaasha, iyada oo ay muuqatay suuragalnimada in la fududeeyo “Isku Xirka Xalqada Jawaab Celinta” ee muwaaddiniinta iyo dawladda.[1]

Talagelinta bulshada oo kororta ayaa waxaa la arkay in ay xoojiso ka qaybgalka bulshada ee go’aan qaadasha iyo soo celinta dareen lahaansho, isla xisaabtan iyo kalsoonida dadku ku qabaan dowladda. Iyada oo jawaab celin la siinayo, dadweynuhu waxa uu dareemayaa in ka qaybgalkiisii hore uu u qalmo dadaalladii ay ku bixiyeen.[2] Talagelinta bulshada waxa ay xoojisaa dimuqraaddiyadda iyada oo hannaanka dawladda ka dhigta mid daahfuran, la isla xisaabtamo, oo ka jawaabaya baahida dadka. Hase ahaatee, dalalka soo koraya waxa ay la kulmaan caqabado waawayn oo ugub ah marka ay ku hawlan yihiin qaabaynta talagelinta bulshada iyo hannaanka dawladnimada ee dimuqraaddiyadda.



*Shaxda 1-aad: Halbeegga ka qaybgalka bulshada/Talagelinta Bulshada*

Halbeegga Ka Qaybgalka Dadweynaha, oo ay horumariyeen Ururka Caalamiga ah ee Ka Qaybgalka Dadweynaha (IAP2), oo ah hannaan qeexaya heerarka kala duwan ee ka qaybgalka bulshada iyo talagelinta bulshada ee hannaanka go’aan gaarista.

Hannaanka talagelinta bulshada waxa uu muujinayaa muhimadda ay leedahay in muwaaddiniinta la siiyo xogaha u suuragelin kara in ay si firfircoon uga qayb galaan naqshadaynta mashaariicda iyo fulintooda. Waxa uu sidoo kale xoogga saarayaa baahida bulshooyinku u qabaan in ay wada shaqayn dhex marto hay’adaha maxalliga ah iyo kuwa dawladda si awood loo siiyo xubnaha bulshada si ay tallaabo u qaadaan una abuuraan saamayn. Laga soo billaabo 1991-kii, Soomaaliya waxa ay la liicaysay xasillooni darro siyaasadeed oo ay sabab u ahayd burburkii maamulkii Siyaad Barre. Buburkii nidaamkii dawladda ayaa sababay in dalku u qaybsamo gobollo iyo kooxo kala duwan oo keentay in ay soo if baxaan kooxo hubaysan iyo maamullo qaab qabiil ku salaysan oo qaybo badan oo dalka ka taliya. Tobanaan sano oo colaado iyo barakac ah ayaa waxa ay saamayn wayn ku yeelatay nudayaashii bulshada. Tani waxa ay caqabad ballaaran ku noqotay in la helo is dhexgal wax ku ool ah oo dhex mara dadka iyo dawladda. Waxa aan halkan ku soo bandhigi doonnaa qaar ka mid ah caqabadahaasi, annagoo soo jeedin doonna talooyin waaqici ah oo aan kaga hadli doonno qaybaha soo socda.

## Caqabadaha Haysta Barnaamijyada Talagelinta Bulshada ee Soomaaliya

Barnaamijyada talagelinta bulshada waxa dunida qaybaheeda kala duwan ka ay noqdeen kuwa muhimmad wayn ku leh horumarinta dawlad loo dhan yahay oo waxtar leh .Qaybaha ay burburka iyo duruufaha colaadeed hareeyeen sida Soomaaliya, fulinta barnaamijyada talagelinta bulshada waxa ay noqdaan kuwa aad u adag. In kasta oo uu dalku horumar yar ka sameeyay dhinacyada xasilloonida, lana dejiyay siyaasado hortebin siinaya sii xoojinta nabada iyo maamul wanaagga iyo fududaynta soo kabashada dhaqaalaha ee dalka, waxaa weli taagan caqabado ballaaran oo la xiriira talagelin bulsho oo wax ku ool ah. Caqabadahaasi waxaa ka mid ah helid la’aanta xogta, heerar aqoonta muwaaddinta oo hoosaysa, caqabado dhanka luqadda ah, iyo taariikhda colaadaha iyo xasillooni darrada. Xallinta caqabadahani ayaa aasaas u ah xoojinta talagelin bulsho oo wax ku ool ah iyo dhismaha bulsho loo dhan yahay oo dimuqraaddi ah.

1. *World Economic Forum: Ten lessons on citizen engagement*
2. *https://countytoolkit.devolution.go.ke/challenges-of-public-participation*

Caqabadahan ayaa waxaa si qoto dheer loogu falanqayn doonaa qaybaha soo socda:

### 01 Xasillooni la'aan siyaasadeed iyo amni darro

Soomaaliya waxa ay la daalaa dhacaysay colaado haraadiyay wax ku dhow soddon sano, iyada oo colaadaha iyo xasillooni darradu ay caqabado ballaaran hor dhigeen dadaallada ay dadwladdu uga jirtay in fuliyo barnaamijyada talagelinta bulshada, maadaama shakhsiyaadka aysan halis amni u arkayaan ka qaybgalka barnaamijyadaasi. Kooxaha hubaysan ee ka jira qaybo ka tirsan dalka ayaa abuuran jawi cabsi iyo hubaal li'i oo dhallinyarada Soomaaliyeed ku riixay in ay ka niyad jabaan ka qaybgalka hannaanka dawladnimada.

### 02 Hannaanka dawladnimad iyo hay'adaha oo daciif ah

Tobanaan sano oo iska hor imaad iyo dagaal ah ayaa Somaaliya ku reebay burbur ballaaran oo ku dhacay kaabayaashii aasaasiga ahaa ee dalka, taas oo dhalisay ha'yado iyo qaabdhismeed dawladeed oo aan sal adag lahayn. Sidaas daraaddeed, waxaa aad u adkayd in la taageero talagelin bulsho oo wax ku ool ah iyo ka qaybgalkooda hannaanka go'aan qaadashada. Hannaankii dawladnimo ee sida daran u burburay, oo mararka qaarna u xaglinayay reeraha qaar, ayaa sii xoojiyay in loo tag sheegto qaybo ka tirsan bulshada iyo reeraha, kuwaas oo aan matalaad buuxda ka helin nidaamka siyaasaddda ee dalka. Tani waxa ay keentay in qaybahaasi bulshada laga saaro hannaankii go'aan qaadashada, iyada oo la hor istaagay awooddii ay u yeelan lahaayeen in ay talo ku yeeshaan hannaanka maamulka dalka. Intaa waxaa sii dheer, caqabadaha la xiriirta qaabdhismeedka dawladdda, oo ay ka mid yihiin in aysan jirin hannaan iyo wadiiqooyin talagelin bulsho, ayaa waxa ay gaabis ka dhigeen xawliga ay dadweynuhu ku baadigoobi karaan xalka arrimaha qaar, taas oo ka niyad jebisay in ay sii wadaan ka qaybgalka, oo natiijaduna noqoto in ay door bidaan in aysan ka qaybgalin geeddisocodka go'aan qaadashada.

### 03 Faham yaridda dadweynaha ee ku aadan kaalinta dawladda iyo u adeegidda bulshooyinka

Natiijada colaadihii daba dheeraaday ee dalka iyo burburkii hay'adaha dawladda ayaa keenay in muwaaddiniin badan uu yaraado fahan cad oo ku saabsan waajibaadka iyo shaqooyinka dawladda ee ku aaddan haqabtirka baahiyaha bulshada, taas oo keentay in aysan qiimo weyn u arkin ka qaybgalka barnaamijyada talagelinta bulshada. Gebi ahaanba, la'aanta ka qaybgalka bushada ayaa waxa ay keeni kartaa in dawladdu lumiso kalsoonidii dadka iyaga oo u arkaya dawladdu in aysan la haysan baahiyaha ay qabaan iyo tabashooyinkooda.

### 04 Caqabadaha dhaqan iyo bulsho ee saamaynta ku yeelanaya ka qaybgal loo dhan yahay

Caqabadaha dhaqan iyo bulsho ayaa kaalin muuqata ku yeelanaya go'aaminta sida bulshooyinku ula falgalayaan hannaanka dawladnimada maadaama qiyamka dhaqanka iyo waxyaabaha la aaminsan yahay ay saamayn karaan sida dadku ugu qaybgalaan ama u arkaan barnaamijyada talagelinta iyo ka qaybgalka bulshada. Maadaama Soomaaliya ay tahay bulsho raggu ku xoog badan yahay, doorka bulsho ee labada jinsi waxa uu yahay mid si adag loo qeexay, iyada oo xaddidaysa ka qaybgalka haweenka ee arrimaha dadweynaha iyo siyaasadda. Sidaas oo kale, takooridda bulshooyinka iyo reeraha tirade yar ee Soomaaliya waxa ay carqaladaynaysaa ka qaygalka iyada oo ka dhigaysa mid aad u adag in ay qayb ka noqdeen ama dood ka keenaan go'aamada dadka talada haya.

### 05 Saboolnimo iyo sinnaan la'aan

Saboolnimada ayaa carqalad ku noqota awoodda muwaaddiniinta ee ka qaybgalka hannaanka go'aan qaadashada. Dhab ahaantii, heerka dakhliga muwaaddinka ayaa saamayn toos ah ku leh ka qaybgalkooda ama ka qaybgal la'aantooda la xiriirta hannaanka go'aan ka gaarista arrimaha dadweynaha. Qaybaha bulshada ee heerarka hoose kaga jira dhaqaalaha waxa ay diiradda saaraan helida waxyaabaha aasaasiga u ah nolosha qoysaskooda halkii ay ka qaybgali lahaayeen kulamada dadweynaha. Dhanka kale, kuwa dhaqaale ahaan ladan, waxa ay leeyihiin fahan fiican oo ku saabsan arrimaha bulshada iyo siyaasadda, waxa ayna u badan tahay in ay ka qaybgalaan arrimaha dawladnimada ee ay danahooda ku tuhmayaan.

## 06 Helidda xogaha iyo isgaarsiinta oo xaddidan

Ka qaybgal bulsho oo wax ku ool ah waxa uu u baahan yahay helidda xogaha muhiimka ah ee waxtarka u leh ka qayb qaadashada, talagelinta qorshaynta, siyaasad dejinta, isla xisaabtanka, iyo saamaynta go'aan qaadashada. Xogtu waxa ay awood siisaa muwaaddiniinta iyada oo abuurta in kalsooni ay ku qabaan go'aamada dawladda. Hase ahaatee, dal baaxad weyn sida Soomaaliya, bulshooyinka ku nool dhulalka miyiga ah iyo gobollada fog waxaa ku adag in ay si fudud u helaan xogaha aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin ee ku saabsan siyaasadaha, qorsheyaasha, miisaaniyadda, barmaamijyada iyo adeegyada. Intaa waxaa sii dheer, xogaha qaarkood oo ah kuwo kakan oo ay adag tahay in la fahmo, taas oo caqabad ku noqonaysa in la helo ka qaybgal dadweyne oo wax ku ool ah.

## 07 Muwaaddiniinta oo filaya in ka qaygalka lagu siiyo lacag

Hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba waxa ay kaalin muhiim ah ka cayaareen horumarinta dhinacyada gargaarka iyo arrimaha banii'aadannimada, iyaga oo bixiyay gargaarkii iyo taageeradii ay u baahnaayeen qaybaha nugul ee bulshada. Hase ahaatee, waxaa jira walaac isa soo tarayay oo la xiriira in hay'adaha aan dawliga ahayn ay abuureen dhaqan ku tiirsanaansho, oo muwaaddiniintu ay filanayaan in lacag lagu siiyo ka qaybgalka arrimaha horumarinta iyo hannaanka go'aan qaadashada. Tani waxa ay yaraysay dareenkii lahaansho ee muwaaddiniinta iyo in ay waqti geliyaan hannaanka go'aan qaadashada, iyada oo ay soo baxday xaalado muwaaddiniintu ay doonayaan in arrimaha dalka ay ka qayb qaataan keliya marka lacag lagu siinayo, oo aysan xiiso iyo danayn dhab ah u hayn in ay qayb ka noqdaan hormarinta bulshooyinkooda.

## 08 Muwaaddiniinta oo aan xiiso u hayn/kala jecleyn

Xiiso la'aanta muwaaddiniinta ayaa ah caqabad xasaasi ah oo saamayn ku leh ka qaybgalka muwaaddiniinta ee barnaamijyada hannaanka dawladnimada. Maqnaanshaha wacyi ku filan iyo barnaamijyo hanuunin ee dadweynaha ayaa Soomaaliya u horseeday in muwaaddiniintu aysan fahmin muhimadda ay leedahay ka qaygalka hannaanka go'aan qaadashada ama saamaynta kale ee ka qaybgalkooda ay dhalin karto. Intaa waxaa dheer, la'aanta fahan midaysan oo ku saabsan waxa noqon kara talagelin bulsho, hababka, habraacyada, iyo macluumaadka loo baahan yahay si loo hubiyo ka qaybgal wax ku ool ah ayaa waxa ay noqotay caqab kale oo dheeraad ah. Sidoo kale, in aan jawaab laga helin talo soo jeedintii iyo ka qaybgalkii hore ee muwaaddiniinta ayaa keenaya in ay daalaan oo ka quustaan in ka qaybgalkoodu uu wax mirodhal ah ka soo bixi karaan.

## 09 Heerka akhris qoraalka oo aad u hooseeya

Heerarka akhris qoraalka oo aad u hooseeya ayaa waxa ay tahay caqabad ballaaran oo hortaagan talagelinta bulsho ee Soomaaliya. Ku dhawaad saddex meelood laba meel (65.5%) oo dadka Soomaaliyeed ah ayaan helin waxbarasho rasmi ah[3]. Soomaali badan, gaar ahaan kuwa ku nool deegaannada miyiga ah ayaan lahayn xirfadaha akhris qoraalka ee aasaasiga ah, halka kuwa badan oo ka mid ahi aysan waxna qori ama akhrin Karin, taas oo xaddidaysa heliddooda xogta lagama maarmaanka u ah hannaanka go'aan qaadashada iyo ka qaybgalka arrimaha dalka

## 10 Matalaad aan dhammaystirnayn

Nidaamka 4.5 ee Soomaaliya ka dhaqan galay ayaa waxa lagu sheegaa in uu sii xumeeyay sinnaan la'aanta iyo takoorka, gaar ahaan midda ka dhanka ah qaybaha bulshada ee tirada yar iyo kuwa laga taagta roon yahay. Reeraha ugu weyn Soomaaliya ayaa waxa ay gacanta ku hayaan danaha dhaqaale ee siyaasadeed ee dalka, iyada oo taas beddelkeed reeraha tirada yar ay heli waayeen matalaad ku filan oo ay ku yeeshaan dhinacyada siyaasadda iyo dhaqaalaha ee dalka. Shaksiyaadka cududda leh ee reeraha waaweyn ayaa waxa ay danahooda iyo danaha reerahooda ka horumariyaan danta guud ee dalka, taasoo horseedaysa siyaasado iyo go'aanno sii ballaarinaya sinnaan la'aanta, siina baahinaysa kala qaybsanaanta reeraha iyo midda u dhaxaysa haweena, dhallinyarada, shakhsiyaadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo kooxaha kale eel aga tirada badan yahay, taasi oo sii ballaarisay farqiga bulsho iyo dhaqaale ee u dhexeeya qaybaha bulshada. Sidoo kale, nidaamka siyaasadda waxaa kontoroola koox yar oo bulshada ka tirsan kuwaas oo gacan wayn ku leh hoggaanka dalka, go'aano ku qaata magaca muwaaddiniinta oo dhan, taas oo xaddidaysa marin-u-helidda iyo fursadaha horseedi kara helidda matalaad ballaaran oo u taagan codadka iyo dano kala duwan oo ku jira hannaanka siyaasadda iyo dawladnimada.

*3. 2022 Somalia Integrated Household Budget Survey (SIHBS)*

# TALOOYIN KU AADDAN SIDA LOO XOOJINAYO TALGELINTA MUWAADDINIINTA

Talagelinta muwaadinka ee waxtarka leh ayaa lagamamaarmaan u ah horumarinta adeeg bixinta Soomaaliya. Ka talagelinta dadweynaha ee qorshaynta iyo habka go'aan-qaadashada, ururinta fal-celinnada, iyo ka faa'iidaysiga tignoolajiyadda, dawladda, ganacsatada, iyo adeeg-bixiyeyaasha kalaba waxay hubin karaan in talagelinta muwaaddinku uu udub-dhexaad u yahay siyaasadda iyo qaabaynta adeegga iyo in adeegyada loo bixiyo hab daboolaya baahida dadka. Si kastaba ha ahaatee, si talagelintu u ahaado tu macne leh oo wax soo saar leh, dawladdu waa in ay garato qiimaha ka qaybgalka oo ay diyaar u tahay in ay ka faa'iidaysato. Qodobbada hoose waa talooyinka ku saabsan sida wadashaqeynta muwaaddiniinta loo kordhin karo si adeeg-bixinta Soomaaliya loo horumariyo oo looga dhigo mid waxtar leh.

## 01 Xoojinta qaab-dhismeedka sharciga si loo ilaaliyo loona horumariyo talgelinta muwaaddiniinta

Waxaa loo baahan yahay in dowladda iyo hay'adaha saaxiibka la ah ay horumariyaan oo hirgeliyaan siyaasado iyo barnaamijyo ka jawaabaya baahiyaha iyo mudnaanta muwaaddiniinta. Tan waxaa ka mid ah siyaasadaha wax looga qabanayo caqabadaha waaweyn ah ee wajahaya bulshada Soomaaliyeed, sida helitaan waxbarasho, daryeel caafimaad, fursado shaqo, xoojinta nabadda iyo amniga, iyo nidaamka dowladnimada. Intaa waxaa dheer, Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay sameyn kartaa qaab-dhismeed sharci oo qeexaya xuquuqda iyo waajibaadka muwaaddiniinta si loo helo aasaas sharci oo loogu talagalay barnaamijyada ka qeybgalka muwaaddiniinta. Sidoo kale, tababaridda shaqaalaha dawladda si kor loogu qaado xirfaddooda si ay muwaaddiniinta uga qaybgaliyaan hannaanka go'aan gaarista, dhiirigelinta muwaaddiniinta si ay ugu lug yeeshaan hababka go'aan qaadashada iyadoo la siinayo abaalmarinno, iyo ka-qaybgalinta ururrada bulshada rayidka ah ee taariikh fiican ku leh barnaamijyada xoojinta talagellinta muwaaddiniinta, arrimahaasi oo dhan waxay gacan ka geysan karaan in muwaaddiniintu ay kaalin ku yeeshaan horumarinta bulshadooda.

## 02 Hormarinta talgelinta dhallinyarda, dumarka, iyo kooxaha laga tirada badan yahay

Dhallinyarada iyo haweenka inta badan talada lagama qaybgeliyo. Ka-qaybgalkooda waxa lagu wanaajin karaa iyada oo la abuurayo barnaamijyo iyaga loogu talagalay oo dhiirrigeliya ka-qaybgalkooda hababka go'aan-qaadashada. Intaa waxaa dheer, haddii dhallinyarada iyo dumarka la siiyo tababarro, sida hoggaaminta iyo u olaleynta xuquuqaha waxay gacan ka geysan kartaa dhisidda xirfadahooda iyo kalsoonidooda. Sidoo kale marka lagu daro guddiyada iyo hay'adaha kale ee go'aan qaadashada waxay taas keenaysaa in codkooda la maqlo iyo in aragtidooda xisaabta lagu darsado.

## 03 Taageeridda bulshada rayidka si loo xoojiyo talgelinta muwaaddinka

Ururada bulshada rayidka ah iyo madax dhaqameedku waxay door muhiim ah ka ciyaaraan fududaynta talgelinta muwaadiniinta. Dawladdu waa in ay kooxahan maalgelin iyo taageero farsamo siisaa si loo xoojiyo kartidooda oo ay si fiican ula falgalaan dadweynaha iyo hay'adaha dawladda. La shaqaynta ururrada bulshada rayidku waxay sahli kartaa talagelinta muwaaddinka iyo in codka dadweynaha la maqlo. Ururradan waxay gacan ka geysan karaan soo ururinta falcelinnada dadweynaha, fududaynta qabashada doodo dadweyne taas oo sahli karta in aragtida dadweynaha muhiim loo arko marka go'aan la gaarayo.

## 04 Hirgalinta hannaan ay muwaaddiniintu ku soo gudbiyaan ra'yigooda ku aaddan adeegga ay helaan

Hirgalinta hannaan ay muwaaddiniintu ku soo gudbiyaan ra'yigooda ku aaddan adeegga ay helaan waa arrin muhiim ah oo ka mid ah talgelinta muwaaddiniinta, waxayna gacan ka geysan kartaa hagaajinta adeeg bixinta iyo xoojinta xiriirka ka dhexeeya muwaaddiniinta iyo dawladda si loo hubiyo in muwaaddiniintu dareemaan in ay ku xiran yihiin dawladahooda hoose. Daneeyayaasha waxa ay tan

ku gaari karaan iyaga oo dejinaya nidaam ay ku helaan falanqeyn iyo in ay bixiyaan jawaab celin si ay muwaadiniintu u siiyaan jawaab celin ku saabsan tallaabooyinka la qaaday iyaga oo ka jawaabaya falcelintooda. Tani waxay tusin doontaa muwaadiniinta in jawaabahooda si dhab ah loo qaatay looguna dhaqmayo, taas oo gacan ka geysan doonta dhisidda kalsoonida dawladda lagu qabo. Intaa waxa dheer, in la tababaro saraakiisha dawladda sidii ay u heli lahaayeen ugana jawaabi lahaayeen jawaab-celinta muwaadinka ayaa looga baahan yahay si loo hubiyo in ay si xirfadaysan u maareeyaan jawaab-celinta isla markaana ay uga hadlaan tabashooyinka iyo cabashooyinka muwaadiniinta si habboon oo waxtar leh.

### 05 Diyaarinta madal islafalgal oo u dhexaysa dawladda iyo muwaaddiniinta oo looga doodo adeeg bixinta

Dawladdu waxay ka faa'iidaysan kartaa habab kala duwan oo isgaarsiin si loo hubiyo ka qaybgalka ballaaran ee bulshada loona fududeeyo isdhexgalka dawladda iyo muwaadiniinta heer deegaan si looga wada hadlo bixinta adeegga. Kuwaas waxaa ka mid ah abaabulka shirarka bulshada, ka faa'iidaysiga idaacadaha maxalliga ah si ay u qabtaan barnaamijyada diiradda saaraya bixinta adeegga, iyo madallo online ah oo bulshada u oggolaanaya inay helaan macluumaad, bixiyaan jawaab celin, iyo inay ka qaybgalaan doodaha ku saabsan bixinta adeegga.

### 06 Ka faa'iidaysiga tignoolajiyadda si kor loogu qaado ka talagelinta muwaaddiniinta

Tiknoolajiyadu waxay noqon kartaa qalab awood leh oo fududeeya talgelinta muwaadiniinta iyo horumarinta adeeg bixinta. Dawladdu waxay ka faa'iidaysan kartaa shabakadaha internetka sida mareegaha iyo baraha bulshada si ay ula xiriirto muwaadiniinta oo ay u bixiso macluumaadka ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada, iyo adeegyada dawladda. Intaa waxaa dheer, iyadoo isticmaalka internetka ee Soomaaliya uu si xawli ah ku socdo, dowladdu waxay abuuri kartaa madallo online ah oo u oggolaanaya muwaadiniinta inay internetka ka helaan adeegyo kala duwan oo dowladeed.

### 07 Dib u habeyntatalagelinta muwaaddininta, ee ku aadan hannaanka dawladda

Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya oo kaashaneysa ganacsatada iyo kuwa kale ee ay khuseyso, waxay ka shaqeyn kartaa sidii loo dardargelin lahaa barnaamijka talgelinta muwaadiniinta, laguna darayo habraacyada, siyaasadda iyo qaab-dhismeedka dowladda.

Dadaalkan iskaashiga ah ayaa horseedi kara kor u kaca hufnaanta, islaxisaabtanka, iyo ka faa'iidaysiga hantida dawladda, ugu dambayntiina kor loo qaado bixinta adeegyada bulshada iyo wax ka qabashada baahiyaha iyo rabitaanka muwaadiniinta Soomaaliyeed.

## Gunaanad

La shaqaynta muwaaddiniinta waxa ay horseeddaa dejinta iyo hirgelinta siyaasado wax ku ool ah oo ka jawaabaya baahiyaha muwaaddiniinta, islaxisaabtan hagaagsan,iyo daahfurfurnaan dhanka hay'adaha dawladda ah. Kordhinta ka qaybgalka muwaaddiniinta waxay kor u qaadi kartaa adeeg bixinta ka jirta Soomaaliya. Jawiga qalafsan ee siyaasadeed iyo bulsheed ee Soomaaliya ayaa caqabad weyn ku ah barnaamijyada talagelintamuwaadiniinta. Taariikhda colaadeed iyo tan xasillooni darro ee dalka soo martay, taag darrida hay'adaha dawladda, iyo caqabadaha dhaqan ee ka-qaybgalka ayaa muwaaddiniinta ku abuuray dareen kalsooni darro, gaar ahaan bulshada inteeda laga tirada badan yahay.

Sara u qaadidda codadka muwaaddiniinta iyo hababka talagelinta muwaaddiniinta, wuxuu bixinayaa rajo ah in Soomaaliya laga dhiso bulsho loo wada dhan yahay oo dimuqraaddi ah. Barnaamijka talgelinta muwaaddinku waxa uu horumarin karaa bulshooyinka xasilan oo dimuqraaddiga ah isaga oo horseedaya in siyaasad-dejiyeyaasha la siiyo fal-celin taas oo nidaamka dawladnimada ka dhigaysa mid daahfuran, ku dhisan islaxisaabtan iyo dhisidda hay'ado xoog badan. Si looga gudbo caqabadaha hortaagan barnaamijka talgelinta muwaaddinka ee wax ku oolka ah ee Soomaaliya, daneeyayaasha waa in ay mudnaanta siiyaan ka qaybgalka muwaaddiniinta, kor u qaadaan hufnaanta iyo isla xisaabtanka, xoojiyaan qaab-dhismeedka sharciga iyo hay'adaha, dhisidda hababka fal-celin iyo ka faa'iidaysiga tignoolajiyadda si loo hubiyo in baahiyaha iyo rabitaanka dhammaan dadka Soomaaliyeed ay helaan matalaad ku filan.

RAAGSAN

**Nagala soo xiriir**

info@raagsan.com
www.raagsan.com

Naga soo raac

@raagsan